

## Shaxda Qiimeynta Dib-u-eegaha

Tartanka – FY25 – Kobcinta Macallimiinta Carruurnimada Hore iyo Macallimiinta Qoysaska

## Qaybaha Codsiga iyo Dhibcaha

1. Soo koobidda Hay'adda iyo Barnaamijka – 10 dhibcood
2. Bayaanka Baahida – 25 dhibcood
3. Kala-duwanaanshaha iyo Sinnaanta – 20 dhibcood
4. Awoodda Hay'adda Codsadaha – 10 dhibcood
5. Iskaashiga Bulshada iyo Qoyska iyo Wacyigelinta – 5 dhibcood
6. Hadafyada Mashruuca, Hawlaha, Istaraatiijiyadaha, Natiijooyinka iyo Jadwalka La Qiyaasay – 20 dhibcood
7. Qorshaha Qiimeynta – 5 dhibcood
8. Miisaaniyadda – 5 dhibcood

Wadarta guud ee dhibcaha suurtagalka ah waa 100.

## Qaybaha Qiimeynta

### Soo koobidda Hay'adda iyo Barnaamijka - 10 dhibcood

### Tilmaamaha Qiimeynta – "Soo koobidda Hay'adda iyo Barnaamijka"

Fadlan isticmaal shaxda hoose si aad u qiimeyso qaybaha kala duwan ee qaybtaan.

Shuruudaha – Tilmaamaha Qiimeynta	Xadka Dhibcaha	Dhibcaha La Abaal Mariyay
Taariikhda/Nidaamka – Sii 1 dhibic haddii si buuxda looga jawaabay, 0 = lama jawaabin ama jawaabta waa mid aan dhammaystirnayn	0-1	
Dhaqaalaha Horumarinta Gobolka– Sii 1 dhibic haddii laga jawaabay, 0 = lama jawaabin ama jawaabta waa mid aan dhammaystirnayn	0-1	
Guudmar Ku Saabsan Qorshaha Barnaamijka Kobcinta Macallimiinta Carruurnimada Hore iyo Macallimiinta Qoysaska (Grow Your Own Early Childhood and Family Educator Program Plan) – Sii 0-5 dhibcood iyadoo lagu saleynayo <b>Heerka Qiimeynta ee ku xusan shaxda hoose</b>	0-5	

Taageeridda Hadafka GYO: Taageerida Ka-qeybgalayaasha Bulshada iyo Iskaashiyada – Sii 1 dhibic haddii laga jawaabay	<b>0-1</b>	
Tirada Ka-qeybgalayaasha La Qiyaasay - Sii 1 dhibic haddii laga jawaabay, 0 = lama jawaabin ama jawaabta waa mid aan dhammaystirnayn.	<b>0-1</b>	
Jadwalka La Soo Jeediyey - Sii 1 dhibic haddii laga jawaabay, 0 = lama jawaabin ama jawaabta waa mid aan dhammaystirnayn	<b>0-1</b>	

## Heerka Qiimeynta ee Shuruudda 3 Kor ku xusan

Qiimeynta/Dhibcaha	Sharaxaadda
Aad u Wanaagsan – 5 Dhibcood	Jawaabtu waa mid xooggan oo <b>muujinaysa karti iyo waayo-aragnimo aad uga sarreysa shuruudaha ugu yar</b> . Codsaduhu si cad ayuu u fahamsan yahay baahida deeqda oo wuxuu ku kalsooni galiyay kartidiisa inuu mashruuca dhammaystiri karo
Wanaagsan – 4 Dhibcood	Jawaabtu waxay <b>ka sarreysaa shuruudaha ugu yar</b> . Codsaduhu wuxuu bixiyay aragtiyo xiiso leh, faahfaahin dheeri ah, wuxuuna muujinayaa xirfadaha iyo awoodda uu u leeyahay inuu mashruuca dhammaystiro.
Fiican – 3 Dhibcood	Jawaabtu waxay <b>la kulantaa shuruudaha ugu yar</b> . Jawaabtu waa mid la aqbali karo oo muujinaysa karti qaar. Codsaduhu wuxuu u muuqdaa inuu fahamsan yahay baahida deeqda iyo kartida uu u leeyahay inuu mashruuca dhammaystiro. Aragtiyo khaas ah lama soo bandhigin.
Dhexdhexaad – 2 Dhibcood	Jawaabtu waxay <b>ka hooseysaa shuruudaha</b> . Codsaduhu wuxuu muujinayaa faham iyo xirfado qaar oo loogu baahan yahay in mashruuca la dhammeeyo. Ma cadda in codsaduhu uu shaqada qaban karo, wuxuuna jawaabtu ku yartahay aragti iyo faahfaahin gaar ah.
Liidasho – 1 Dhibic	Jawaabtu aad bay uga hooseysaa shuruudaha. Codsaduhu si ugu yar buu ula kulmaa shuruudaha, laakiin wax kale oo badan lama bixin. Codsaduhu ma fahamsana meelaha muhiimka ah oo ma muujinaysa xirfadaha lagama maarmaanka ah ee mashruuca lagu dhammayn karo.
Lama Bixin Jawaab, Cadeyn La'aan, ama Aan Dhammaystirneyn – 0 Dhibcood	Jawaab lama bixin/lagama soo darin shuruudaha meel kasta oo codsiga ka mid ah, ama gebi ahaanba lama fahmin/ama aan dhammaystirneyn.

## Bayaanka Baahida – 25 dhibcood

### Tilmaamaha Qiimeynta – "Bayaanka Baahida"

Fadlan isticmaal shaxda hoose si aad u qiimeyso qaybaha kala duwan ee qaybtaan.

Shuruudaha – Tilmaamaha Qiimeynta	Dhibcaha La Abaal Mariyay
<b>Baahiyaha Guud</b> – Sii 0-5 dhibcood, 0 waxay tilmaamaysaa baahi la'aan ama baahiyaha ayaa aan caddayn ama aan macno samayn, ilaa 5 oo tilmaamaysa baahi heer sare ah	
<b>Kooxaha Bartilmaameedka ah (Bulshada &amp; Macallimiinta)</b> – Sii 0-5 dhibcood, 5 waxay aqoonsanaysaa shan ama in ka badan kooxo bartilmaameed ah, 4 waxay aqoonsanaysaa afar kooxood, 3 waxay aqoonsanaysaa saddex kooxood, 2 waxay aqoonsanaysaa laba kooxood, 1 waxay aqoonsanaysaa hal koox bartilmaameed ah, 0 waxay aqoonsanaysaa kooxo la'aan ama kooxuhu waa aan caddayn	
<b>Xogta</b> – Sii 0-5 dhibcood, 0 waxay tilmaamaysaa inaysan aqoonsanayn wax xog ah ama xogtu aanay cadayn ama aanay macno samayn, ilaa 5 oo faahfaahin buuxda bixisa si loo taageero baahiyaha la aqoonsaday	
<b>Taageeridda Dadaallada Hadda</b> – Sii 0-5 dhibcood, 0 waxay tilmaamaysaa inaysan aqoonsan wax taageero ah ama taageeradu aanay cadayn ilaa 5 oo faahfaahin buuxda bixisa oo ku saabsan taageeridda dadaallada hadda jira	
<b>Carqaladaha La Aqoonsaday</b> – Sii 0-5 dhibcood, 5 waxay aqoonsanaysaa shan ama in ka badan carqalado, 4 waxay aqoonsanaysaa afar carqalad, 3 waxay aqoonsanaysaa saddex carqalad, 2 waxay aqoonsanaysaa laba carqalad, 1 waxay aqoonsanaysaa hal carqalad, 0 waxay aqoonsanaysaa carqalado la'aan ama carqaladuhu waa aan caddayn ama aan macno samayn	

## Kala-duwanaanshaha iyo Sinnaanta – 20 dhibcood

### Tilmaamaha Qiimeynta – "Kala-duwanaanshaha iyo Sinnaanta"

Fadlan isticmaal shaxda hoose si aad u bixiso dhibcaha guud ee aad dareento in codsaduhu si wanaagsan uga jawaabay ballanqaadka sinnaanta, kala-duwanaanshaha, ka mid noqoshada, iyo dadaallada ku aaddan la-jirka ee ku jira soo jeedintooda.

Tilmaamaha Qiimeynta	Tilmaamaha Qiimeynta - Hagaha Dhibcaha

Heer Sare – 16 - 20 Dhibcood	Jawaabtu waa mid xooggan oo muujinaysa ballanqaad sare oo ku saabsan sinnaanta, kala-duwanaanshaha, ka mid noqoshada iyo la-jirka. Awoodda lagu taageerayo dadaallada diiradda saaraya sinnaanta ayaa si cad u muuqata iyada oo loo marayo faahfaahin gaar ah oo aad u qoto dheer.
Aad u Wanaagsan – 11 - 15 Dhibcood	Jawaabtu waxay ka sarreysaa shuruudaha ugu yar. Codsaduhu wuxuu bixiyay aragtiyo xiiso leh, faahfaahin dheeri ah, wuxuuna muujinayaa ballanqaad aad u wanaagsan oo ku saabsan sinnaanta, kala-duwanaanshaha, ka mid noqoshada iyo la-jirka. Awoodda lagu taageerayo dadaallada sinnaanta ayaa muuqata.
Wanaagsan – 6 - 10 Dhibcood	Jawaabtu waxay la kulantaa shuruudaha ugu yar. Jawaabtu waa mid la aqbali karo oo muujinaysa ballanqaad wanaagsan oo ku saabsan sinnaanta. Codsaduhu wuxuu u muuqdaa inuu leeyahay dadaallo qaar oo ku saabsan sinnaanta, kala-duwanaanshaha, ka mid noqoshada, iyo la-jirka. Aragtiyo khaas ah lama bixiyay.
Dhexdhexaad – 2 - 5 Dhibcood	Jawaabtu waxay ka hooseysaa shuruudaha. Codsaduhu wuxuu muujinayaa faham iyo xoogaa diiradda ah oo ku saabsan sinnaanta, kala-duwanaanshaha, ka mid noqoshada, iyo la-jirka. Ma cadda in codsaduhu uu taageero dadaallo gaar ah oo si toos ah diiradda u saaraya sinnaanta. Jawaabtu kuma jiraan aragtiyo gaar ah iyo faahfaahin. Qaar ka mid ah faahfaahinta ayaa u baahan in la caddeeyo.
Liidasho – 1 Dhibic	Jawaabtu aad bay uga hooseysaa shuruudaha. Codsaduhu ma muujinayo ballanqaad ku saabsan sinnaanta, kala-duwanaanshaha, ka mid noqoshada, iyo la-jirka. Jawaabtu kuma jiraan diiradda ku saabsan dadaallada sinnaanta mana bixiso wax faahfaahin ah ama waa mid aad u kooban. Waxaa loo baahan yahay caddeymo badan.
Lama Bixin Jawaab, Cadeyn La'aan, ama Aan Dhammaystirnayn – 0 Dhibcood	Jawaab lama bixin/laguma soo darin wax dadaallo ku saabsan sinnaanta, kala-duwanaanshaha, ka mid noqoshada ama la-jirka, ama gebi ahaanba lama fahmin/ Aan caddayn iyo/ama aad ayuu u dhammaystirnayn. Waxaa loo baahan yahay caddeymo aad u badan.

## Awoodda Codsadaha – 10 Dhibcood

### Hagaha Dhibcaha – “Awoodda Ururka ama Hay’adda Codsadaha”

Fadlan isticmaal shaxdan hoose si aad u siiso dhibco guud sida aad u aragto in codsaduhu si wanaagsan uga jawaabay awooddiisa uu ku hirgelin karo mashruuca soo jeedintiisa.

Qiimeynta/Dhibcaha	Tilmaamaha Qiimeynta
Heer Sare – 9 - 10 Dhibcood	Jawaabtu waa mid xooggan oo muujinaysa awood sare oo lagu fulin karo hawlaha iyo yolalka deeqda. Dhammaan su'aalaha awoodda ayaa laga jawaabay, doorka iyo masuuliyadda shaqaalaha ha ahaadeen (kuwa mushaar leh ama kuwa aan mushaar lahayn) si cad ayaa loo sharaxay. Hababka ka mid noqoshada waxay si cad uga tarjumayaan baahida ka

	qaybgalayaasha. Qandaraaslayaasha hoose iyo la-hawlgalayaasha dibadda ayaa la aqoonsaday, waxaana lagu sharaxay doorkooda iyo masuuliyaddooda halka ay khuseyso.
Aad u Wanaagsan – 7 - 8 Dhibcood	Jawaabtu waxay <b>ka sarreysaa shuruudaha ugu yar</b> . Codsaduhu wuxuu bixiyay faahfaahin badan oo <b>muujinaysa awood aad u wanaagsan oo lagu fulin karo hawlaha iyo yoolalka deeqda</b> . Inta badan su'aalaha awoodda waa laga jawaabay, waxaana la sharaxay doorka iyo masuuliyadda shaqaalaha (kuwa mushaar leh ama kuwa aan mushaar lahayn). Hababka ka mid noqoshada waxay inta badan ka tarjumayaan baahida ka qaybgalayaasha. Qandaraaslayaasha hoose iyo la-hawlgalayaasha dibadda waa la aqoonsaday, waxaana inta badan lagu sharaxay doorkooda iyo masuuliyaddooda halka ay khuseyso.
Wanaagsan – 5 - 6 Dhibcood	Jawaabtu waxay <b>la kulmaysaa shuruudaha ugu yar</b> . Jawaabtu waa mid la aqbali karo oo <b>muujinaysa awood wanaagsan oo lagu fulin karo hawlaha iyo yoolalka deeqda</b> . Su'aalo qaar oo ku saabsan awoodda waa laga jawaabay, waxaana la aqoonsaday oo la sharaxay doorka iyo masuuliyadda shaqaalaha (kuwa mushaar leh ama kuwa aan mushaar lahayn). Hababka ka mid noqoshada waa lagu daray. Qandaraaslayaasha hoose iyo la-hawlgalayaasha dibadda waa la aqoonsaday, waxaana si dhexdhexaad ah loo sharaxay doorkooda iyo masuuliyaddooda halka ay khuseyso. Waxaa laga yaabaa in sharaxaad dheeraad ah loo baahdo.
Dhexdhexaad – 3 - 4 Dhibcood	Jawaabtu waxay <b>ka hooseysaa shuruudaha</b> . Jawaabtu waa mid la aqbali karo in qayb ahaan la hirgeliyo, <b>waxayna muujinaysaa awood hoose oo lagu fulin karo hawlaha iyo yoolalka deeqda</b> . Su'aalo yar oo awoodda ku saabsan ayaa laga jawaabay. Waxaa loo baahan yahay sharaxaad dheeraad ah.
Aad u Liidata – 1 - 2 Dhibic	Jawaabtu aad ayay uga hooseysaa shuruudaha. Jawaabtu waa mid aad u liidata oo aan muujinayn <b>awood lagu fulin karo hawlaha iyo yoolalka deeqda</b> . Su'aalaha awoodda waxay ka maqan yihiin faahfaahin ama lama soo hadal qaadin. Sharaxaad badan ayaa loo baahan yahay.
Lama Soo Jawaabin, Lama Caddayn, ama Way Dhammaystirnayn – 0 Dhibcood	Jawaab lama bixin/lama soo hadal qaadin wax su'aal ah, ama jawaabta waa mid aan dhammaystirnayn iyo/ama aad u caddayn. Waxaa loo baahan yahay sharaxaad aad u badan.

## Iskaashiga Bulshada iyo/ama Qoyska iyo Wacyigelinta – 5 dhibcood

### Tilmaamaha Qiimeynta – "Iskaashiga Bulshada iyo/ama Qoyska iyo Wacyigelinta"

Fadlan isticmaal shaxda hoose si aad u bixiso dhibcaha guud ee aad dareento in codsaduhu si wanaagsan uga jawaabay hababka iskaashiga iyo wacyigelinta ee bulshada iyo/ama qoysaska ee ku jira soo jeedintooda.

Qiimeynta/Dhibcaha	Shuruudaha - Tilmaamaha Qiimeynta
Heer Sare – 5 Dhibcood	Jawaabtu waa mid xooggan oo muujinaysa ballanqaad sare oo ku saabsan iskaashiga. Dhamaan qaybaha waa si fiican loo daboolay loona sharaxay.
Aad u Wanaagsan – 4 Dhibcood	Jawaabtu waxay ka sarreysaa shuruudaha ugu yar. Codsaduhu wuxuu bixiyay faahfaahin badan oo muujinaysa ballanqaad aad u wanaagsan oo ku saabsan iskaashiga. Su'aalaha ugu badan ee ku saabsan iskaashiga waa laga jawaabay oo waa la sharxay.
Wanaagsan – 3 Dhibcood	Jawaabtu waxay la kulantaa shuruudaha ugu yar. Jawaabtu waa mid la aqbali karo oo muujinaysa ballanqaad wanaagsan oo ku saabsan iskaashiga. Qaar ka mid ah su'aalaha ku saabsan iskaashiga waa laga jawaabay oo waa la sharxay. Waxaa laga yaabaa in faahfaahin dheeri ah loo baahan yahay.
Dhexdhexaad – 2 Dhibcood	Jawaabtu waxay ka hooseysaa shuruudaha. Jawaabtu waa la aqbali karaa oo muujinaysa ballanqaad yar oo ku aaddan iskaashiga. Su'aalaha ku saabsan iskaashiga waxaa laga jawaabay si kooban. Waxaa loo baahan yahay in la caddeeyo qaar ka mid ah arrimaha.
Liidasho – 1 Dhibic	Jawaabtu aad bay uga hooseysaa shuruudaha. Jawaabtu waa mid aan ku filneyn oo ma muujinayso ballanqaad ku aaddan iskaashiga. Su'aalaha ku saabsan iskaashiga waa laga tagay ama faahfaahin kuma filna. Waxaa loo baahan yahay caddeymo badan.
Lama Bixin Jawaab, Cadeyn La'aan, ama Aan Dhammaystirnayn – 0 Dhibcood	Jawaab lama bixin/su'aal kasta lama soo darin, ama jawaabtu waa mid aad u dhammaystirnayn ama si aad ah uma cadda. Waxaa loo baahan yahay caddeymo aad u badan.

## Hadafyada Mashruuca, Hawlaha, Istaraatiijiyadaha, Natiijooyinka, iyo Jadwalka La Qiyaasay – 20 dhibcood

### Tilmaamaha Qiimeynta – "Hadafyada Mashruuca, Hawlaha, Istaraatiijiyadaha, Natiijooyinka, iyo Jadwalka La Qiyaasay"

Fadlan isticmaal shaxda hoose si aad u bixiso dhibcaha guud ee aad dareento in codsaduhu si wanaagsan uga jawaabay Hadafyada Mashruuca, Hawlaha, Istaraatiijiyadaha, Natiijooyinka, iyo Jadwalka La Qiyaasay ee ku jira soo jeedintooda.

Qiimeynta/Dhibcaha	Shuruudaha - Tilmaamaha Qiimeynta
--------------------	-----------------------------------

Heer Sare – 16 - 20 Dhibcood	Jawaabtu waa mid <b>xooggan oo aad uga sarreysa shuruudaha ugu yar</b> . Waxay si cad, si dhammaystiran, si xikmad leh, oo dhab ah u qeexaysaa hadafyada, hawlaha, natiijooyinka, iwm, kuwaas oo u muuqda inay la jaanqaadayaan yoolalka deeqda iyo filashooyinka gaarka ah ee barnaamijka; wax sharaxaad dheeraad ah looma baahna.
Aad u Wanaagsan – 11 - 15 Dhibcood	Jawaabtu waa <b>mid aad u wanaagsan oo ka sarreysa shuruudaha ugu yar</b> . Jawaabtu waxay aqoonsanaysaa hadafyada, hawlaha, natiijooyinka, iwm. iyadoo faahfaahin qaar leh oo muuqata inay ku waafaqsan yihiin yoolalka deeqda iyo filashooyinka gaarka ah ee barnaamijka; Sharaxaad dheeraad ah looma baahna.
Wanaagsan – 6 - 10 Dhibcood	Jawaabtu waxay <b>la kulantaa shuruudaha ugu yar</b> . Jawaabtu waxay aqoonsanaysaa hadafyada, hawlaha, natiijooyinka, iwm. iyadoo faahfaahin qaar leh oo muuqata inay ku waafaqsan yihiin yoolalka deeqda iyo filashooyinka gaarka ah ee barnaamijka; wax sharaxaad dheeraad ah looma baahna.
Dhexdhexaad – 2 - 5 Dhibcood	Jawaabtu waxay <b>ka hooseysaa shuruudaha</b> . Jawaabtu waxay aqoonsanaysaa hadafyada, hawlaha, natiijooyinka, iwm., laakiin waa mid faahfaahin yar leh oo aan si cad ugu waafaqsaneen filashooyinka gaarka ah ee barnaamijka; waxaa loo baahan karaa caddeyn dheeraad ah.
Liidasho – 1 Dhibic	Jawaabtu <b>aad bay uga hooseysaa shuruudaha</b> . Jawaabtu si macno leh, si buuxda, ama si feker leh uma daboolin hadafyada, hawlaha, natiijooyinka, iwm. Su'aalo badan ayaa wali aan laga jawaabin.
Lama Bixin Jawaab, Cadeyn La'aan, ama Aan Dhammaystirnayn – 0 Dhibcood	Jawaab lama bixin ama codsaduhu ma daboolin hadafyada mashruuca, hawlaha, natiijooyinka, iyo jadwalka la qiyaasay ee qaybtan ama meel kale oo ka mid ah codsiga. Waxaa loo baahan yahay caddeymo aad u badan.

## Qorshaha Qiimeynta – 5 dhibcood

### Tilmaamaha Qiimeynta – "Qorshaha Qiimeynta"

Fadlan isticmaal shaxda hoose si aad u bixiso dhibcaha guud ee aad dareento in codsaduhu si wanaagsan uga jawaabay Qorshaha Qiimeynta ee ku jira soo jeedintooda.

Qiimeynta/Dhibcaha	Shuruudaha - Tilmaamaha Qiimeynta
Aad u Wanaagsan – 5 Dhibcood	Jawaabtu waa mid xooggan. Jawaabtu si cad oo dhammeystiran ayey u sharaxaysaa qorshaha qiimeynta; wax caddeyn ah looma baahna.

Aad u Fiican – 4 Dhibcood	Jawaabtu waxay <b>ka sarreysaa shuruudaha ugu yar</b> . Jawaabtu aad bay ugu filan tahay in ay sharaxdo qorshaha qiimeynta; wax sharaxaad dheeraad ah looma baahna.
Fiican – 3 Dhibcood	Jawaabtu waxay <b>la kulantaa shuruudaha ugu yar</b> . Jawaabtu waxay sharaxaysaa qorshaha qiimeynta iyadoo leh faahfaahin gaar ah; faahfaahin dheeraad ah ayaa faa'iido u noqon lahaa fahamka iyo/ama waxaa loo baahan karaa caddeyn.
Dhexdhexaad – 2 Dhibcood	Jawaabtu waxay <b>ka hooseysaa shuruudaha</b> . Jawaabtu waxay sharaxaysaa qorshaha qiimeynta laakiin waa mid aad u kooban oo faahfaahin yar leh; faahfaahin dheeraad ah ayaa faa'iido u noqon lahayd fahamka iyo/ama waxaa loo baahan karaa caddeyn dheeraad ah
Liidasho – 1 Dhibic	Jawaabtu aad bay <b>uga hooseysaa shuruudaha</b> . Jawaabtu si macno leh, si buuxda, ama si feker leh uma daboolin hadafyada, hawlaha, natiijooyinka, iwm. Su'aalo badan ayaa wali aan laga jawaabin.
Lama Bixin Jawaab, Cadeyn La'aan, ama Aan Dhammaystirnayn – 0 Dhibcood	Jawaab lama bixin/laguma soo darin su'aalo kasta, ama jawaabtu waa mid aad u dhammaystirnayn ama si aad ah uma cadda. Waxaa loo baahan yahay caddeymo aad u badan.

## Miisaaniyadda Excel oo wata Sharaxaad – 5 dhibcood

### Hagaha Qiimeynta – “Miisaaniyadda Excel oo wata Sharaxaad”

Fadlan isticmaal shaxda hoose si aad u bixiso **dhibcaha guud** ee aad dareento in codsaduhu si wanaagsan uga jawaabay Qorshaha Qiimeynta ee ku jira soo jeedintooda.

Qiimeynta/Dhibcaha	Shuruudaha - Tilmaamaha Qiimeynta
Aad u Wanaagsan – 5 Dhibcood	<b>Jawaabtu waa mid xooggan</b> . Jawaabtu si cad oo dhammeystiran ayey u sharaxaysaa qorshaha qiimeynta; wax caddeyn ah looma baahna.
Aad u Fiican – 4 Dhibcood	Jawaabtu waxay <b>ka sarreysaa shuruudaha ugu yar</b> . Jawaabtu aad bay ugu filan tahay in ay sharaxdo qorshaha qiimeynta; caddeyn yar ama aan loo baahnayn.
Fiican – 3 Dhibcood	Jawaabtu waxay <b>la kulantaa shuruudaha ugu yar</b> . Jawaabtu waxay sharaxaysaa qorshaha qiimeynta iyadoo leh faahfaahin gaar ah; faahfaahin dheeraad ah ayaa faa'iido u noqon lahaa fahamka iyo/ama waxaa loo baahan karaa caddeyn.



Dhexdhexaad – 2 Dhibcood	Jawaabtu waxay <b>ka hooseysaa shuruudaha</b> . Jawaabtu waxay sharaxaysaa qorshaha qiimeynta laakiin waa mid aad u kooban oo faahfaahin yar leh; faahfaahin dheeraad ah ayaa faa'iido u noqon lahayd fahamka iyo/ama waxaa loo baahan karaa caddeyn dheeraad ah
Liidasho – 1 Dhibic	Jawaabtu <b>aad bay uga hooseysaa shuruudaha</b> . Jawaabtu si macno leh, si buuxda, ama si feker leh uma daboolin hadafyada, hawlaha, natiijooyinka, iwm. Su'aalo badan ayaa wali aan laga jawaabin.
Lama Bixin Jawaab, Cadeyn La'aan, ama Aan Dhammaystirnayn – 0 Dhibcood	Jawaab lama bixin/laguma soo darin su'aalo kasta, ama jawaabtu waa mid aad u dhammaystirnayn ama si aad ah uma cadda. Waxaa loo baahan yahay caddeymo aad u badan.

## Aragtida Guud

Ayadoo lagu saleynayo dib-u-eegista guud ee codsiga iyo dhibcaha aad siisay, fadlan dooro talada maalgelinta. Waxaad haysataa mid ka mid ah saddexda doorasho:

1. **Aan La Talo-Bixin** – Haddii aad doorato Aan La Talo-Bixin, waxaan filaynaa inaad ku salayso dhibco hoose iyo faallooyin sharaxaya daciifnimada muhiimka ah ee ku jira codsiga.
2. **Talo-Bixin Wadata Faahfaahin(yo)** – Haddii aad doorato, fadlan cayim waxa faahfaahinta barnaamijka ay tahay in shaqaalaha ka raadiyaan ka hor inta aan la siin deeqda.
3. **Talo-Bixin**

**FIIRO GAAR AH:** Waaxda Waxbarashada Minnesota (MDE) waxay dib u eegi doontaa talo-bixinta iyo dhibcaha ka hor inta aan la gaadhin go'aanka kama dambaysta ah ee maalgelinta. Waxaa laga yaabaa in loo baahdo faahfaahin dheeraad ah oo ka timaada dib-u-eegayaasha ama codsadaayaasha. Dhammaan go'aannada MDE waa kama dambays.